

Qalbigaaga Mid kale boos ma uga banana yahay?

Ururka Gargaarka Carruurta (Children's Aid Society) ama CAS ee Windsor iyo Essex waxuu u baahan yahay shakhsiyat ama qoysas jecel inay koriyaan ilma aysan dhalin oo uu ururku mas'uulka ka yahay, da' kastaba ha jireen eh. Kaligiin la idinku sii daynmaayo. Waaliddiinta carruurta aysan dhalin korinayaa (foster parents) waxay la shaqaynayaan howlwadeenno ku shaqaynaya hab wada shaqayn oo isku xirxiran, kuwaasoo siinahaya kaalmo dhaqaale, war-galinta/macluumaad siinta iyo xagga dareenka hiykaca. Waannu ku garab istaagaynaa si aad ugu guulaysatid howshaan. Carruurtu waxay u baahan yihiin meel ammaan ah ayna ku koraan kuna barbaaraan. Nala soo xiriir maanta si aad u noqoto waalid koriya ilma uusan dhalin (foster Parent) kana faa'iidayso abaal marin waarta.



WINDSOR-ESSEX
Children's Aid
Society

Haddii aad tuhuntid/shaki kaa galo inuu jiro cunug halis u ah waxyeellayn ama dandarro, fadlan na soo wac. Diyaar baannu nahay 24 saac oo maalmeed, iyo sannadka 365 tiisa maalmoodba

Xafiiska Windsor waa:
1671 Riverside Drive East
Windsor, ON N8Y 5B5
519-252-1171

Xafiiska Leamington waa:
15 John Street
Leamington, ON N8H 1H1
519-322-0555

www.wecas.on.ca



WINDSOR-ESSEX
Children's Aid
Society

Guushayadu adigay kaa bilaaban

Hagaha Wararka
Guud



Maxuu yahay Ururka Gaargaarka Carruurta (Children's Aid Society/CAS) ?

Ururka Gargaarka bulshadu u shaqeeyaa si uu ugu deeqdo carruurta iyo qoysaskooda taageero iyo taakulayn. Waxuu ku amran yahay xaqijinta sharciga Adeegyada Carruurta iyo Qoysaskooda waxaana maalgaliya Wasaaradda Adeegyada Carruurta iyo Dhallinyarada ee Ontario. Waa mas'uuliyadda Ururka Gaargaarka Carruurta inuu baaritaan ku sameeyo ashtakooyinka ku aadan waxyeellaynta Carruurta, oo ay kamid tahay dandarro/rafaad ku noolayn, isagoo isla markaana u fidinaya adeegyo la xiriira dhibaato ka dhawrista Carruurta dhallinyarada iyo qoysaskoodaba.

Ururka Gargaarka Carruurta ee Windsor iyo Essex

waxaa xukumah guddi agaasimayaal ah oo taageerah ururka shaqadiisa iyo himiladiisa kuwaasoo xooggooda saara u doodidda inay carruurta iyo qoysaskooduba adeegyo tayo/wax tar leh helaan. Xubnaha guddigu waxay si gaarah isugu taxallujiyaan wanaajinta noloshu carruurta isla markaana ruux kastoo iyaga ka midna wuxuu ku deeqaa khibrado gaarah oo uu ku taageerayo howl fulinta ururka. Ururkaani wuxuu soo jiray tan iyo 1899 kii waxuuna u taagna had iyo jeer xoojinta isku duubnaanta qoyska.

Ururka Gargaarka Carruurta ama CAS ee Windsor iyo Essex waxaa u shaqeeya koox dadaal badan oo shaqa yaqaan ah assalkooda iyo aqoontooduna ay kala duwan tahay. Waxaa soo raaca shaqaalaha, inaan haysanno taageerada waaliddiinta carruurta aysan dhalin koriya (foster parents) iyo iskood wax u qabtayaal/ walanteeri. Kooxdaan qaaska ah aysan cidina u dhigmini waxay taageero ka gaystaan dhinac walba oo la xiriira shaqada ururka, waxayna ka kaalmeeyaan adeegyada sida tooska ah u gaara carruurta iyo qoysaska.

Qaybaha (departments):

Adoption (Korinta Carruurta aan la dhalin) . Adeegyada Carruurta . Isgaarsiinta iyo horumarinta . Adeegyada Qoyska . Barnaamijka Booqashada Qoyska . Wanaajinta noloshu Qoyska . Maaliyadda. Shaqada iyo shaqaalaha . Tignooloojiyada. Intake (xog soo aruurinta) . Barnaamijka Xirfo Nololeedka. Dayac-tirka . Ka hortagga . Cayminta Tayada. Ilaha dhaqaalaha. Adeegyada iskaa wax u qabadka

Ururka Gargaarka Carruurta waxuu bulshada u qabtaa:

- Waxuu baaritaan ku sameeyaa dhammaan dacwooyinka ku aadan naxariis- darrada iyo dandaraynta carruurta loo gaysto
- Waxaa dhibi inay soo gaadho kana dhowraa/ilaaliyaa carruurta iyo dhallinyarada la soo dhibaateeyay , dandarreeyay amaba dhibaateyn halis u ah isagoo ka taageeraya qoysaska siday u dhimi lahaayeen waxayaa baha dhibaateynta badan keenaya.
- Waxuu siiyaa talo bixin qoysaska carruurtoodu ay halista u yihiin wax yeellayn amaba dandarro .
- Waxuu u gudbiyaa/wareejiyaa qoysaska bulshada qaybaheeda kale kuwaasoo bixiya adeegyada khaaska ah iyo daawaynta.
- Waxuu si fir-fircooni ah ugu howlan yahay xoojinta isku duubnaanta qoys walba isagoo kala shaqaynaya waaliddiinta sare u qaadda khibradooda ku aadan rabbaynta carruurta.

Haddii aad doonayso xog dheeraad ah si aad u noqoto waaliddiinta carruurta aysan dhalin koriya (foster parent), iskii-wax u qabte, deeq bixiye, amaba aad rabto inaad wax ka ogaato adeegyadayada, fadlan naga soo booqo onlineka:

www.wecas.on.ca



Ururka Gargaarka Carruurta

waxuu xoogga saaraa wanaajinta noloshu iyo nabad gelyada cunug walba isagoo u doodaya, iskaashi/wada shaqaynta la yeelanaya carruurteenna, qoysaska, iyo bulshadaba.

- Waxuu isku soo dubbaridaa adeegyada daawaynta carruurta aannu mas'uulka ka nahay , kolkii loo baahdoba.
- Waxuu u raadshaa/goobaa hoy habboon oo ay ku noolaan karaan carruurta Ururka uu mas'uulka ka yahay.
- Shaqaalaynta, taba-baridda iyo taageeridda cidda carruurta aysan dhalin korinaya (foster parents) iyo kuwa sida rasmiga ah loo siiyay carruurta (adoptive homes)
- Macluumaad iswaydaarsi iyo soo bandhigid ayuu bulshada ugu soo gudbiyaa adeegyada aqoon korodsiga iyo ka hor-tagga
- Waxuu bulshada u soo gudbiyaa fursado kala duwan oo iskaa wax u qabad ah/walanteeri oo kor u qaada kaalmaynaayana shaqada Ururka

